**[Geli magaca bixiyaha gurigalacag la'aanta ah]**

# Qorshaha Wareejinta Degdega ah ee Dhibanayaasha Rabshada Qoyska, Rabshada Shukaansiga, Weerarka Galmada, ama Dabagalka

## Wareejinada Degdega

**[Geli magaca bixiyaha guriga lacag la'aanta <u>(magaca loo soo gaabiyay HP ee ujeedooyinka qorshaha noocaan)</u>]** waxay ka walaacsanyihiin badbaadada kireystayaashooda, walaac noocaas ahna wuxuu ku kordhaa kiraystayaasha ah dhibanayaasha rabashada qoyska, rabashada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.Sida waafaqsan Xeerka Rabshada Qoyska ee Dumarka Ka soo horjeedo (VAWA),[1] HP waxay u ogolaaneysaa kireystayaasha ah dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka lagu codsanayo wareejinta degdega ee qeybta hadeer ee kireystaha ee qeyb kale.Kartida lagu codsanayo wareejinta waa la heli karaa iyada oo aan laga eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiyada, ama dooqa galmada.[2] Kartida HP ee lagu sharfayo codsi noocaas ah ee kireystayaasha hadeer helayo caawinta, si kastaba, waxay ku xirnaan kartaa xiliga go'aaminta hordhaca ee in kireystaha ama wuxuu ahaa dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, iyo hadii HP ay leedahay qeyb kaloo hoy ah ee loo heli karo iyo waa badbaado in la siiyo kireystaha deegaan ku meelgaar ama toos ah.

---

[1] Ayadoon laga fiirinayn magaca sharcigaan, illaalada VAWA waxaa loo heli karaa dhammaan dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, iyo dabagalka, oo aan laga eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiga, ama dooqa galmada.

[2] Bixiyayaasha guryahay kuma takoori karaan si ku saleysan sifo walboo illaalsan, oo ay ku jiraan jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, diinta, jinsiga, heerka qoyska, curyaannimada, ama da'da.Guryaha HUD-caawisay oo ku caymisan HUD waa in loo diyaariyaa dhammaan shaqsiyaadka u qalmo ee aan laga eegin dooqa galmada dhabta ama dooqa galmada loo gartay, aqoonsiga jinsiga, ama heerka guurka.

Qorshahaan wuxuu aqoonsadaa kireystayaasha u qalmaa wareejinta degdega, waraaqaha loogu baahanyahay wareejinta degdega, illaalada qarsoodiga, sida wareejinta degdega ay dhici karto, iyo ku jaheynta kireystayaasha badbaadada iyo amniga.Qorshahaan wuxuu ku saleysanyahay qorshaha wareejinta nooca degdega ah ee ay daabaceen Waaxda Guriyeynta iyo Hormarinta Magaalada Mareykanka (HUD), hay'ada faderaalka ee kormeertaa in **[geli magaca barnaamijka ama caawinta kirada halkaan]** waxay waafaqsantahay VAWA.

**U qalmida Wareejinada Degdega ah**

Kireystaha ah dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, sida lagu sheegay sharciyada HUD ee 24 CFR qeybta 5, qeybta hoose L wuxuu u qalmaa wareejinta degdega, haddii: kireystaha si macquul ah u aaminsanyahay inay jiraan halista waxyeelo dhow ee rabshad dheeraad ah haddii kireystaha ku haro isla qeybta.Haddii kireystaha uu yahay dhibanaha weerarka galmada, kireystaha wuxuu sidoo kale u qalmi karaa wareejinta haddii weerarka galmada uu ka dhaco dhismaha ee gudaha muddada 90-maalmood kaleendarka ah oo ka horeyso codsiga wareejinta degdega.

Kireystaha codsanayo wareejinta degdega waa inuu si muuqata ugu codsadaa wareejinta sida waafaqsan nidaamyada lagu sharaxay qorshahaan.

Kireystayaasha aanan haysan sabab wanaagsan waxay weli codsan karaan wareejinta degdega haddii ay buuxiyaan sharuudaha u qalmida ee qeybtaan.

**Waraaqaha Codsiga Wareejinta Kireystaha Degdega**

Si aad u codsatid wareejinta degdega, kireystaha wuxuu ogeysiinayaa xafiiska maamulka HP oo ku gudbinayaa codsi qoran oo wareejinta **[HP oo goobta la gelinayo]**. HP waxay ku bixineysaa hoy macquul ah xeerkaan ee shaqsiyaadka curyaanka ah.Codsiga qoran ee kireystaha ee wareejinta degdega waa inuu ku jiraa midkood:

1. Bayaanka muujinayo in kireystaha si macquul ah u aaminsanyahay inay jiraan halista waxyeelo dhow ee rabshad dheeraad ah waxay ku harayaan isla qeybta hoyga ee lagu caawiyay sida waafaqsan barnaamijka HP; AMA
2. Bayaanka ah in kireystaha uu ahaa dhibanaha weerarka galmada iyo in weerarka galmada ee ka dhacay dhismaha ee gudaha muddada 90-maalmood kaleendarka ee ka horeyso codsiga wareejinta degdega.

**Qarsoodi ah**

HP waxay joogteyneysaa qarsoodiga warbixin walba oo uu kireystahu gudbiyo oo ku codsanayo wareejinta degdega, iyo warbixinta ku saabsan wareejinta degdega, illaa kireystaha ka siiyo HP ogolaansho qoran ee lagu siideynayo warbixinta oo ku saleysan xadeynta waqtiga, ama siideynta warbixinta waxaa looga baahanyahay sharci ahaan ama u baahanyahay isticmaalka nidaamka ka saarida ama dhageysiga ee la xiriiro ka joojinta caawinta barnaamijka daboolan.Tani waxaa ku jiro joogteynta qarsoodiga goobta cusub ee qeybta hoyga kireystaha, haddii mid la bixiyay, ee dadka sameeyay falalka ee rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ka soo horjeedo kireystaha.Fiiri Ogeysiinta Xaquuqda Daganaanshaha sida waafaqsan Xeerka Rabashada Ka soo horjeedo Dumarka Oo Dhammaan Kireystayaasha wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan masuuliyada HP ee lagu joogteynayo qarsoodiga warbixinta la xiriirto dhacdooyinka rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

**Waqtiyeynta Wareejinta Degdega ah iyo Helitaanka**

HP ma damaanad qaadi karto in codsiga wareejinta la ansixinayo ama inta ay qaadaneyso in laga baaran dago wareejinta codsiga.HP waxay, si kastaba, ku dadaalaysaa inay sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah uugu rarto kireystaha ah dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ee qeyb kale, ayadoo kuxiran helitaanka iyo

badbaadada qeybta. Haddii kireystaha si macquul ah u aaminsanyahay in wareejinta la soo jeediyay aysan badbaado u noqoneynin, kireystaha wuxuu codsan karaa wareejinta qeyb kale.Haddii qeybta la heli karo, kireystaha la wareejiyay waa inuu ogolaadaa inuu u hogaansamo xeerarka iyo sharuudaha ee maamulo daganaanshaha qeybta ee kureystaha loo wareejiyay.HP laga yaabo inaysan u suurtogalin wareejinta kireystaha qeyb gaar ah haddii kireystaha uusan aasaanin ama uusan aasaasi karin u qalmida qeybtaas.

Haddii HP ma lahan qeybo badbaado oo la heli karo ee kireystaha u baahan degdega u qalmo, HP waxay ku caawineysaa kireystaha lagu aqoonsanayo bixiyayaasha guri kale ee laga yaabo inuu leeyahay qeybo badbaado oo la heli karo ee kireystaha u guuri karo.Codsiga kireystaha, HP waxay sidoo kale ku caawineysaa la xiriirida hay'adaha deegaanka ee caawinta siiyo dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ee ku lifaaqan qorshahaan.

**Badbaadada iyo Amniga Kireystayaasha**

Hawsha socota ee wareejinta iyo wareejinta dhabta ah, haddii la ansixiyo oo ay dhacdo, kireystaha lag doonayaa inuu qaado dhammaan taxadarada macquulka ah ee uukubadbaadaayo. Kireystayaasha ah ama ahaa dhibanayaasha rabshada qoyska waxaa lagu dhiirogelinayaa inay la xiriiraan Qadka Rabshada Qoyska Qaranka ee 1-800-799-7233, ama hoyga rabshada qoyska deegaanka, wixii caawin ee lagu aasaasayo qorshaha badbaadada.Wixii dadka qabo curyaannimada maqalka, in qadka lagu gali karo adiga oo waciyo 1-800-787-3224 (TTY). Kireystayaasha ahaa dhibanayaasha weerarka galmada wuxuu soo wici karaa Shabakada Qaranka Kufsiga, Xadgudubka iyo Galmada Qadka Weerarka Galmada Qaranka ee 800-656-HOPE, ama booqo qadka onleenka ee https://ohl.rainn.org/online/.

Kireystayaasha ee ah dhibane ama ahaa dhibane ee dabagalka oo raadinayo caawin wuxuu booqan karaa Xarunta Qaranka ee Dhibanayaasha Dambiga Xarunta Illaha Dabagalka ee https://www.victimsofcrime.org/our-programs/stalking-resource-center.

**Lifaaqa:**Hay’adaha deegaanka ee siinayo caawinta dhibanayaasha rabshada qoyska, taariiqda rabshada, weerarka galmada, ama dabagalka.